

Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa

Guudmarka

Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa ayaa nolosha ka dhigi karta mid fudud, kordhin karta madax-bannaanida iyo ismaamulka waxayna shakhsiyadka ku dhiirrigelin kartaa in ay ku noolaadaan nolosha ay doonayaan.

Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa waa agabka, qalabka, aaladaha ama nidaamyada loo isticmaalo in ay qofku ka caawiyaan in uu nolol aad u madax-bannaan ku noolaado. Tani waxaa ka mid noqon kara aaladaha sida tablets-ka, barnaamijyada wadahadalka, daare-damiyaal, sameecad casri ah oo codka la hawlgasha iyo filo sameysa xiriir koronto oo casri ah oo lagu daminayao ama lagu shidayo qalabka guryaha lagu adeegsado, iyo maacuunta ka caawinaysa hawlaha sida cunista, labisashada iyo wax qoridda. Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa waxay sidoo kale dadka ka caawinaysaa barashada isticmaalka aaladda iyo taageero farsamo haddii loo baahdo.

Shuruudaha Xaq-u-yeelashada

Qofka helaya waa in uu soo go'aamiyaa in uu yahay macmiil xaq u leh Maamulka Naafonimada Koritaanka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada iyo in uu ku qoran yahay mid ka mid ah barnaamijyadan DDA ee soo socda:

- Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice).
- Ka-tanaasulidda 1915c ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan (Home and Community Based Services 1915c Waiver).
- Baarista Dhigista Ka Hor iyo Dib-u-eegista Degaanka (Pre-Admission Screening and Resident Review).
- Waddooyinka loo maro Deeqda Nolosha Bulshada (Roads to Community Living Grant).



Awoodda

Maaliyadda federaalka ee waafaqsan qaybta 1915c ee Xeerka Damaannada Bulshada, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan iyo maaliyadda gobolka.

Cutubka 388-845 WAC, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Saleysan ee DDA.

Cutubka 388-845-0415 WAC, Waa maxay tiknoolajiyadda dadka caawisa?

Cutubka 388-845-0420 WAC, Kumaa noqon kara bixiyaha adeegga tiknoolajiyadda dadka caawisa ee la aqoonsan yahay?

Cutubka 388-845-0425 WAC, Ma jiraan xaddidaadyada tiknoolajiyadda dadka caawisa ee aad heli karto?

Cutubka 388-106 WAC, Adeegyada Daryeelka Muddada-Dheer.

Cutubka 388-106-0270 WAC, Waa maxay adeegyada la heli karo ee hoos imaanaya barnaamijka doorashada koowaad ee bulshada (community first choice)?

Cutubka 388-106-0273 WAC, Miyaan heli karaa adeegyada wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah ee shakhsiyeed oo dheeraad ah?

Cutubka 388-106-0274 WAC, Ma jiraan xaddidaadyada tiknoolajiyadda dadka caawisa ee aan heli karo?

Miisaaniyad

Ka hor cudurka safmarka ah ee COVID-19, Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa waxaa kaliya laga helayay laba ka mid ah shanteenna ka-tanaasulid. Wuxaan helitaanka ku ballaariyay dhammaan ka-tanaasulidda ilaa Lifaqa K debecsanaanta. Bisha Sibtembar 2022, Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa ayaa si joogto ah loogu darey dhammaan shanta ka-tanaasulid.

Qiimayaasha

Ka-qaybgalayaasha waxay helayaan ilaa \$550 sannad kasta oo loogu talagalay Tababbarka Xirfado Barashada ama Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa.

Kormeerkaa

Dibadda

- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.
- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.

Gudaha

- Xafiiska U-hoggaansamidda, Korjoogteynta iyo Tababbarka ee DDA.
- Xafiiska Adeegyada iyo Barnaamijyada Tayada leh ee DDA.

